

DAWLADA FEDERAALKA



WARQADA KAHORTAGA

GUDNIINKA
FIRCOONIGA AH

Markasta waa inaad qaadato warqadaan ilaalinta marka aad u safrayso dibada. Tani waxay kuu oggolaanaysaa inaad si cad ugu muujiso qoyskaaga in gudniinka fircooniga ah uu sharci daro ka yahay Jarmalka uuna keeni karo iijn qofku dhowrsano xabsi u galo.

Dawlada Federaalka ee Jumhuuriyada Federaalka ee Jarmal



Federal Ministry for
Family Affairs, Senior Citizens,
Women and Youth



Federal Ministry
of Justice and
Consumer Protection

Christine Lambrecht

Wasiirka Ariimaha Qoyska, Muwaadiniinta, Dumarka iyo Dhallaanka
Wasiirka Caddaalada Ilaalintamacaamiisha



Federal Foreign Office



Federal Ministry
of the Interior, Building
and Community

Heiko Maas
Wasiirka Arrimaha
Dibada

Horst Seehofer
Wasiirka Arrimaha Gudaha,
Dhismaha iyo Bulshada



Federal Ministry
of Health

Jens Spahn
Wasiirka Caafimaadka ee Federaalka

Gudniinka fircooniga waa dembi waana xadgudub wayn oo loo geysanaayo xaquuqda bini'aadamka, wuxuuna gabdhaha iyo dumarka u geystaa caawaaqiib xumo muddo dheer jir, mid jireed iyo mid maskaxeed. Qaliinka gudniinka fircooniga wuxuu sidoo kale si toos ah u keeni karaa dhimasho sababo la xariira dhiig badan oo qofka ka baxa ama wuxuu keenaa caabuq aad u xun.

Dalka Jarmalka, sameynta gudniinka fircooniga waa fal dembiyeed cawaaqiibtiisutahay xamsi gaarayaa illaa 15 sano.



Gudniinka fircooniga waa qayb kamid ah ama gabi ahaanba xubinta taranka dumarka looga goynaayo; ayadoo loo maraayo qaab aad u xun, waxaa la tolaa gabi ahaanba afka xubinta taranka.

Maxaan ku sameynayaa warqadaan?

Waxaad soo qaadan kartaa warqadaan waxaadna tusi kartaa qoyskaaga jooga dalkaaga hooyo. Warqadu waxay caddeynaysaa in sameynta gudniinka fircooniga uu **fal dembi** ka yahay Jarmalka – xataa haddii lagu soo sameeyo meel ka baxsan dalka. Waxay sharaxaysaa inaad wajahayso illaa **15 sano oo xabsi ah** haddii aad gabartaada ku sameyso gudniinka fircooniga ama haddii qof kale uu sameeyo gudniinka fircooniga aadana arrintaan ka hor istaagin inuu sameeyo ama xataa haddii aad ka caawiso qaliinka. Sidoo kale waxaa lagaa hor istaagi karaa inaad soo gasho Jarmalka ama waxaad dhummin doontaa deganaanshahaaga dalka.

Fal dembiyed (qaybta 226a ee Xeerka Dembiga)

Sida ku xusan sharciga Jarmalka, sameynta gudniinka fircooniga waa fal dembiyeed (qaybta 226a ee Xeerka Fal Dembiga). Qof walba oo sameynaaya gudniinka fircooniga wuxuu ku kacayaa fal dembiyeed wuxuuna qofku wajahaaya xabsi gaaraya illaa 15 sano.

Gudniinka fircooniga sidoo kale waa lagugu ciqaabi karaa haddii lagu sameeyo **meel ka baxsan dalka** ama qofka sameynaaya uu yahay Jarmal, ama haddii gabadha ama Haweeneyda lagu sameynaayo uu yahay Jarmal ama degan yahay ama meesha ugu wayn ee ay degan yihiin haddii ay tahay Jarmal.

Qof walba oo caawiya qof jooga Jarmalka ama dibada oo sameynaaya gudniinka fircooniga ayaa sidoo kale fal dembiyeed gelaaya.



Qof walba oo qof kale ku dhiirigeliyaaya inuu sameeyo gudniinka fircooniga ayaa sidoo kale gelaaya fal dembiyeed.

Kani waxaa kamid ah waalidiinta aan ka hortagin in gabartooda lagu sameeyo gudniinka fircooniga haddii ay joogto Jarmal ama meel ka baxsan.

Gabarta ama haweeneyda lagu sameeyo gudniinka fircooniga wax dembi ah ayadu kuma lahan mana lagu ciqaabaayo.

Dadka sameynaaya gudniinka fircooniga ah, ku dhiirigeliya dadka inay sameeyaan, ama ku guuldareysta inay gabdhahooda kahor istaagaan ayaa sidoo kale dhumintaa deganaaanshaha dalka ay ku joogaan waxaana loo diidi karaa inay galaan dalka Jarmalka.



Waa maxay gudniinka fircooniga?

Gudniinka fircooniga ah waa xadgudub **wayn oo ka dhan ah xaquuqda Aadanaha** oo qaar ama guud ahaanba laga jaraayo faruuraha xubinta taranka (ayadoo loo maraayo qaab aan wanaagsanayn) waxaana la tolaa xubinta taranka dumarka, mararka qaarna waxaa keliya la dhahaa dalool yar oo le'eg cirbad. Gabdhaha waxaa ka imaan kara dhiig badan inta lagu jiro qaliinka ama dhawaacu wuxuu keeni karaa caabuq, kuwaas oo sababi kara **natiijo xun oo cawaaqiin xumo leh** xataa wuxuu sababi karaa **dhimasho**.

- ❗ **Xanuun muddo dheer ah, dhaawac maskaxeed**
- ❗ **Dhibaatooyin dhalmo, caabuqyo joogto ah**
- ❗ **Dhibaatooyinka dareenka iyo xanuunka inta lagu jiro galmada**

Dumarka lagu sameeyo gudniinka fircooniga keliya ma la kulmaan **xanuun muddo dheer ah, xaalado maskaxeed iyo dhibaatooyinka dhalmada**. Sidoo kale waxay la kulmaan caabuqa joogtad ah ee kilida ama caabuqa kaadi haysta waxayna badanaa la kulmaan dhibaatooyinka dhanka dhiiga caadada ah.

Dhaawacyada jireed iyo kuwa maskaxeed ayaa sidoo kale si wayn xadgudub ku ah xaquuqada aadanaha iyo xaquuqda gabdhaha ee ay si sax ah ugu hamiyi karaan galmo. Sameynta galmada ayaa inta badan noqoto mid xanuun badan; dareenka galmada ayaa hoos u dhaca ama maba dareemaan hami galmo sababo la xariira in ja jarjaray dareenadoodii.

Marka la sameeyo, gudniinka fircooniga **badanaa dib looma soo celin karo**.

Halkeen ka helaa caawimaad? Maxaaan sameeyaa haddii aan ka shakiyo in la igu sameyn doono gudniinka fircooniga ah (FGM)?

Haddi aad ka walwalsan tahay in adiga ama qof kale oo aad taqaano uu halis ugu jiro in loo qaado dal kale si loogu sameeyo FGM ama haddiiba halistaa ay ka jirto Jarmalka, waxaad la xariiri kartaa

- ➔ **booliiska (taleefan lambarka: 110) ama**
- ➔ **Xaafiiskaaga deegaanka ee gunnooyinka dhallinta.**

Laynka caawimaada Xadgudbyada ka dhanka ah Dumarka ayaa sidoo kale bixiya caawimaad ayadoo la adeegsanaayo taleefan ama wada sheekeysii oonleen ah.



08000 116 016

- ➔ Taleefoon lambarka: 08000 116 016
- ➔ www.hilfetelefon.de

Laynka caawimaada wuxuu bixiyaa talo bixin ayadoo la adeegsanaayo 18 luuqadood – 24/7, oo bilaash ah ahna qarsoodi.

Haddii aad banaanka dalka ku qaban tahay aadna u bahan tahay caawimaad waxaad la xariir kartaa Ergayda Jarmalka ee kuugu dhaw.

Jarmal:
www.auswaertiges-amt.de/de/ReiseUndSicherheit/deutsche-auslandsvertretungen

Ingiriis:
www.auswaertiges-amt.de/en/aussenpolitik/laenderinformationen



Calaamadee

Warqadaan ilaalinta waxay kamid tahay hawlaha xiriirka dadwaynuhu la leeyihiin Federaalka, waxaa lagu heli karaa lacag la'aan loogumana talagalin in la iibiyo.

Waxaa daabacay ayagoo matalaaya Dawlada Federaalka:

Bundesministerium

für Familie, Senioren, Frauen und Jugend

Referat Öffentlichkeitsarbeit

11018 Berlin

www.bmfsfj.de

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, wac taleefoonkeena

adeega caawimaada: +49 30 20 179 130

Isniinta–Khamiista: 9 am – 6 pm

Fakiska: +49 30 18 555-4400

Iimeelka: info@bmfsfj.service.bund.de

Taleefan lambarka adeega bulshada ee dhammaan hay'ada dawlada iyo xaafiisyada: 115*

Markay ahayd: Maayo 2021, daabacaadii 1aad (somali)

Naqshadeynta: www.zweiband.de

Daabacaha: MKL Druck GmbH & Co. KG

* Haddii aad qabto su'aalo guud oo ku aadan xaafiisyada dawlada iyo hay'adaha, lambarka adeegyada dadwaynaha ee ah 115 ayaa sidoo kale la heli karaa. Deegaanka ka qaybgalaaya, 115 waxaa la heli karaa 8 da subaxnimo illaa 6 da maqribnimo inta u dhexeysa Isniinta iyo Jimcaha. Wicitaanada laymanka Jarmalka iyo khadad kale oo badan marka laga soo waco 115 waxaa lagu soo dalacaa qiimaha maxaliga ah sidaas daaraadeed dadka haysra lambarada lacag la'aanta ah waxba laguma dalacaayo. Dadka dhagoolayaasha ah waxay macluumaadkaan ku heli karaan ayagoo garaacaya ciwaanka SIP ka ee ah 115@gebaerdentelefon.d115.de. Si aad u oggaato in 115 laga heli karo gobalkaaga iydo wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan lambarka adeega guud fadlan booqo <http://www.d115.de>.